



Gacaliye/so ka Qeybqaatayaasha,

Waxaan maanta ku faraxsanahay in aan ku biiro asxaabtayda ku baahsan Waaxda Nabadsugidda Wadanka (Department of Homeland Security (DHS)) oo aan idin ogeysiyo qabyo-qoraalka Qorshaha Marin-u-Helida Luqadda ee Xafiisyada iyo Qeybaha ay DHS ka kooban tahay. Qorshahan qabyo-qoraalka ah ayaa wuxuu qeexayaa dadaalka loogu jiro in Qeyb kasta oo DHS ka tirsan ay barnaamijyada iyo howlaha ku bixiyaan si waxtar u lehna loogu gudbiyo shaqsiyaadka Xadidan Aqoontooda luqadda Ingiriiska (LEP) ayna ahaataa sida waafaqsan Amarka Go'aan meel-marinta 13166, Horumarinta Marin-u-Helida Adeegyada loogu talagalay Shaqsiyaadka Aqoontooda ku Hadalka Ingiriisiga Xaddidan yahay (11 Agoosto, 2000) iyo Qorshaha Helida Luqaddaha ee markii ugu horeysay soo baxay bishii Fibraayo 2012.

Waan soo dhowaynaa aragtidaada iyo faalooyinkaaga ku aadan qorshaha qabyo-qoraalka ka hor inta aan la dhammaystirin. Qorshaha qabyo-qoraalka waxaad ka helaysaa bogga internetka DHS oo ah www.dhs.gov/language-access. Faalooyinka qoraalka ah ee aad usoo gudbinayso (CRCL) (Cabashada Xuquuqda Dad-weynaha) iimayl ahaan ayaad ku soo diri kartaa crcloutreach@dhs.gov kama dambays 31^{ka} Oktoobar, 2014. Sidoo kale waan soo dhoweynaynaa in aan idinla kulanno oo aad timaadaan mid ama in ka badan oo ah kulmadda ka qeybgalyaasha oo la qaban doono bilaha soo socda.

Sida lagu xusay qoraalkii rasmiga ahaa ee 2011 ee ka soo baxay Xeer Ilaaliya Guud Eric Holder, Qorshaha Helida Luqaddaha ee DHS ayaa sharaxaya shuruudaha ay qabtaan barnaamijka helida luqadda tahay laba arrimood: takoor la'aan iyo dowlad wax-tar leh. Wuxuu sharaxay in "[H]noqoto mar ay jiraan Xaalad deg-degga ama inta lagu jiro arrimo joogto ah, in la helo dadaalada ay dowladdu ugu jirto in si taabo gal ah ay ula xiriirto xubnaha dad-weynaha ayaa waxay ku xiran tahay sida baahsan oo takoor la'aan ah waa in loo heli karaa xogta lagama-maarmaan ka ah, ee saxda ah, waqtigii loogu talagalay la heli karaa." Waaxda Caddaaladda Mareykanka Qeybta Xuquuqda Madaniga ayaa waxaan weydiisanay in ay tani naga kaalmayso dib-u-hubinta Qeybaha qorshaha qabyo-qoraaleedka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qabyo-qoraaleedka Qorshaha Marin-u-Helida Luqadda iyo fursado aad ku bixinayso wixii talo ah ka soo qeybgal mid ka mid ah kulamada aan idin qabanayno, fadlan la soo xiriir crcloutreach@dhs.gov. Haddii Ingiriiska aadan ku hadli karin ama aadan qori karin, CRCL waxay kuu heleysaa tarjumaanno luqaddaada kugula hadla.

Megan H. Mack

Xafiiska Xuquuqda Madaniga iyo Xoriyadaha Madaniga